



UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **24/12/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

ISKA IIBIYE:- XASAN MAXAMUUD CULUSOOW XASAN, Hooyo: Aamino Maxamuud Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1976, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01179593

TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO
Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Hodan)**, "Gaar ahaan Goofka Xuseen Cali Lugoole" Cabirka: **(20X15)-M**, Looto No: **3545-F**, W.M.L: **(XNL/B3/1220/23)**, Tr. 16/11/2023, Kana Soo Baxay Nootaayo Liibaan, Uuna Saxiixay Dr. Liibaan Cismaan Aadan

IIBSADE:- CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD, Hooyo: Muno Cadaan Maxamuud, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1972, Degan Muqdisho

SOOHDINTA DHULKA
Bari: Dhul dad, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: **Jid**
QIIMAHA DHULKA: USD \$7,500 (Toddobo Kun Shan Boqol Doolarka Mareykanka ah).

B- Aniga oo ah **XASAN MAXAMUUD CULUSOOW XASAN**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey **CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD** Dhulkayga banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD** Ahna Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkayada Dhulkaan Kuna qancay heshiiskan.

J- Anaga oo Kala ah C/kariin Axmed Aw Xasan & Xasan Maxamed Nuur Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecaan.

X- **ASALKII HORE:** C/qaadir Axmed Maxamed RL:- 104619, Tr. 15/01/2014, Sabarlog No: 19/19/2014, Tr. 16/01/2014, Kana Soo Wada Baxeen D/H ee Muqdisho Cabirka (20X30)-M Looto No 3543-3545-F.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA

XASAN MAXAMUUD CULUSOOW XASAN

SAXIIXA IIBSADAHHA DHULKA

CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- C/KARIIN AXMED AW XASAN

2- XASAN MAXAMED NUUR

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 925/T.P.N/23, Tr. 24/12/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Xasan Maxamuud Culusoow Xasan** Ahna (Iska iibiye), **2- Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud** Ahna (Iibsade) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: Sayid

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

IIBIYE: XASAN MAXAMUUD CULUSOOW XASAN



IIBSADE: CUMAR MUXAYADIIN CALI MAXAMUUD



(MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA)

MARAG: CABDIKARIIN AXMED AW XASAN



MARAG: XASAN MAXAMED NUUR



Computer ID

0092029



LAMBAR BOONADA 001-00000117217

LACAGTA:

25.00



**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU**

WARQADDA DIIWAAN GELINTA KALA WAREEJINTA DHULKA

Date Issued 30-Dec-2023

Dowladda Hoose ee Muqdisho waxey diiwaangalinasay Becca lambarkiisu yahay

REF-NO. 925/T.P.N/23

Taariikh

30-Dec-2023

Booska lotto no

3545-F

Cabirkisuna yahay

20 x 15-M

Kuna yaala
Degmada/Deegaanka

Hodan

Kana soo baxay nootayada

Maxamed Cabdullaahi Maxamed siyaad

Kuna wareegay

CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD

Kana wareegay

XASAN MAXAMUUD CULUSOOW XASAN

Asalka: magaca loo cabiray:

C/QAADIR AXMED MAXAMED RL:-104619 TR:-15/1/2014 SABARLOG-
NO. B.19/B.19/2014 TR:-16/1/2014 D/H/X CABIRKA.20 X 30-M LOTTO-NO.
3543-3545.F

Duqa Magaalada ee Muqdisho

Mayor of Mogadishu

Yuusuf Xuseen Jimcaale





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2023 - TRS-183045



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqsaysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

3543- 3545-F

TITLE DEED NO

W.M.L.(XNL/B3/1220/23) TR 16/11/2023

DEGMADA

Hodan

CABIRKA

20X30-M

CIDDA WAREEJINEYSA

XASAN MAXAMUUD CULUSOOW

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

XASAN MAXAMED NUUR & CUMAR MUXYADIIN CALI

NOTARY

NOOTAAYO TAYO

NOTARY REF

924-925-/T.P.N/23

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$15,000.00

Taariikda la bixiyey:

30/12/2023 06:33:03



TRS-
183045

Waaxda Canshuuraha Barriga



REF.No: XNL/B3/1220/2023

TR: 16-11-2023

UJEEDO: HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAN

Muqdisho; maanta oo ay taariikhdu tahay **16-Nov-2023**, waxaa xafiiska **Liban Notary** oo ku yaal **KM5, Soobe, Muqdisho-Soomaaliya**, horyimid dadka ay magacyadoodu hoos ku xusanyihiin, waxa ay codsadeen in loo kala qoro heshiis kala gadasho dhul Banan.

ISKA IIBIYAHA DHULKA		IIBSADAHA DHULKA	
Magaca:	Maxamed Axmed Weheliye	Magaca:	Hassan Mohamud Ulusow
Hooyada:	Halima Abdulle Beile	Hooyada:	Amino Mohamud Moahmed
Ku dhashay:	Beledweyn	Ku dhashay:	Muqdisho
Sanadka:	1949-kii	Sanadka:	1976-kii
Aqoonsiga	P00953325-passport-Somali	Degan:	Muqdisho
Damiinu-aqoonka:	Hawa Mohamed Mohamud		
Aqoonsiga:	124670128-UK		

TILMAAMAHA DHULKA		QIIMAHA & MILKIYADDA DHULKA	
Ku yaal:	Degmada Hodan	WML:	Rep.No2334/2017, TR: 07-03-2017.
Cabbirka:	20x30-M	Ka soo baxday:	Nootaayo Muqdisho
Ka kooban:	2-Boos	Saxiixay:	Dr.Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil)
Lotto No:	3543,3545-F.	Qiimaha:	USD: 10,000.00
Soohdinta:	Waqooyi Jid inta kale dhul dad	Q. Qoraal ah:	Toban kun oo Dollar.

QIRAALKA ISKA IIBIYAHA: Aniga oo ah **Maxamed Axmed Weheliye** waxa aan caddeynayaa in **Hassan Mohamud Ulusow** aan ka iibiyay dhulka leh tilmaamaha sare, qaatayna lacagteyda oo dhameystiran, dhulku waxa uu ka madax bannaanyahay rahan deyn iyo sheegasho sharci ah ee cid kale, waxa aan masuul ka ahay wixii ka soo laabta milkiyadda dhulka oo ah ceeb xaga sharciga documentiga ah ama sheegasho sharci ah ee cid kale, wixii canshuur dowladeed ah oo maanta kadib lagu yeeshana iibsadaha oo aan milkiyadda ku wareejiyay ayaa iska bixinaya si waafaqsan shareecada Islaamka iyo XMS, heshiiskan waxa aan galay aniga oo ay maskaxdeydu fiiyowdahay cid i qasabtayna aysan jirin.

QIRAALKA IIBSADAHA: Aniga oo ah **Hassan Mohamud Ulusow** waxa aan caddeynayaa in **Maxamed Axmed Weheliye** aan ka aqbalay beeca dhulka sare ku xusan aniga oo ku qanacsan raalina ka ah sifada iyo shuruudaha milkiyadda, heshiiskan waxa aan galay aniga oo ay maskaxdeydu fiiyowdahay cid i qasabtayna aysan jirin, waxaa markhaatiyaal ka ah heshiiska:-

MARAG1: AXMED MAXAMED CIGAAL **MARAG2: FAARAX CABDI AXMED**
MARAG3: CABDIRAXMAAN AXMED CALI

SAXIIXA DAMIINU-AQOONKA: HAWA MOHAMED MOHAMUD

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA
MAXAMED AXMED WEHELIYE

SAXIIXA IIBSADAHA DHULKA
HASSAN MOHAMUD ULUSOW

SUGITAANKA NOOTAAYAHA

Aniga oo ah **AVV. Liban Osman Adan** leh Xafiiska Nootaayo Liban; waxa aan sugayaa in beeca dhulka sare ku xusan uu yahay mid sax ah waafaqsan Shareecada Islaamka & qodobada **88, 89, 415** ee XMS, magacyada iyo in saxiixyada sare ku xusanna ay yihiin kuwa saxda ah, waxaana lagu qoray beecaan diiwaanka guud ee Nootaayada iyada oo loo keydiyay nuqul.


A. FITAH



Becc

R-924/T.P.N/23

lv-24/12/23

20X15-m

L-3543-F

Becc


R-925/T.P.N/23

lv-24/12/23


20X15-m

L-3545-F

SAWIRKA ISKA IIBIYAHA





SAWIRKA IIBSADAHA




SAWIRKA DAMIINU-AQOONKA



SAWIRADA MARKHATIYAASHA





NOOTAAYO MUQDISHO
Dr. CALI BIIL
ORIGINAL

JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

Rep.n 2334/2017

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN OO MUNIJIBAALAH

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay 07/03/2017, anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, Xafiisna ku leh Ceelasha Biyaha, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan oo munijibaale ah, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

1) Mudane **Salaad Gabayre Cali**, hooyadiisna la yiraahdo Xaawo Cabdullaahi Raage, ahna Soomaali, kuna dhashay Magaalada Beledweyne, sanadkii 1951, lehna Baasaboorka Soomaaliya ee lambarkiisu yahay **P00440013**, ahna laga iibsadaha dhulka, kana wakiil ah Marwo Faadumo Axmed Weheliye, sida ku qoran wakaaladda lambarkeedu yahay **2290/2017**, taariikhdeeduna tahay **04/03/2017**, kana soo baxday Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil);=====

2) Mudane **Maxamed Axmed Weheliye**, hooyadiisna la yiraahdo Xaliimo Cabdulle, ahna Soomaali, kuna dhashay Magaalada Beledweyne, sanadkii 1949, ahna iibsadaha dhulka.=====

Dadkaas dhulka kala iibsaday anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan oo munijibaale ah. Mudane Salaad Gabayre Cali wuxuu Mudane Maxamed Axmed Weheliye ka iibiyey dhulka loo wakiishay oo ah **20x30**, lana mid ah **600MQ**, kuna qoran lotto lambar: **3543** iyo **3545-F**, kuna yaalla Degmada Hodan, wuxuuna kaga iibiyey dhulkaas lacag dhan **USD 4,700** (Afar kun iyo toddoba boqolo dollar) oo bannaan, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray laga iibsadaha dhulka, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaas waxay Marwo Faadumo Axmed Weheliye ku yeelatay qoraalka lambarkiisu yahay **2285/2017**, taariikhdiisuna tahay **04/03/2017** ee uu qoray Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil). Dhulkaas waxay sohdimihiisu yihiin sidatan: **Waqooyi** waxaa ka xiga jid, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, iibsaduhuna wuxuu caddaynayaa inuu soo arkay dhulkaas, fiiro gaar ahna u soo yeeshay, inuu la wareegana uu diyaar u yahay. Sidaas daraaddeed, wuxuu laga iibsadaha dhulku qoraalkaan ku caddaynayaa inuu masuul ka noqon doono wixii ceebaal ah ama durid sharci ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey, markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen.=====

SAXIIXA LABADA DHINAC

1) Mudane Salaad Gabayre Cali

(libiye) _____

2) " Maxamed Axmed Weheliye

(libsade) 7 _____

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Mudane Cabdulqaadir Maxamed Xuseen

2) " Maxamed Cali Nuur

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 4ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo wada deggan Muqdisho, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan u akhriyey, kuna qanceen.=====

NOOTAAYO

Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil)



(Signature)

Bee

REFNO=XNL/B3/1220/2023

CABIRKAC=20X30-M

LOTTO NO=3543, 3545-F

TR=16-11-2023



JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

NOOTAAYO MUQDISHO
Dr. CALI BIIL
ORIGINAL

UJEEDDO: WAKAALAD GUUD

Rep.n 2290/2017

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay 04/03/2017, anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, Xafiisna ku leh Ceelasha Biyaha, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan bixin wakaalad guud, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Marwo Faadumo Axmed Weheliye, ahna 59 sano jir, hooyadeedna la yiraahdo Caasho Cismaan Raage, ahna Soomaali, kuna dhalatay Magaalada Beledweyne, lehna Baasaboorka Soomaaliya ee lambarkiisu yahay **P00482804**, ahna wakaalad bixiyaha;=====
- 2) Mudane Salaad Gabayre Cali, hooyadiisna la yiraahdo Xaawo Cabdullaahi Raage, ahna Soomaali, kuna dhashay Magaalada Beledweyne, sanadkii 1951, ahna wakaalad aqbalaha.=====

Dadkaas hantida guud isku wakiishay anigoo Nootaayo ahi markaam dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan bixin wakaalad guud. Marwo Faadumo Axmed Weheliye waxay Mudane Salaad Gabayre Cali u wakiilatay inuu iibin karo, hibeyn karo, u dacwoon karo, dhisi karo, Maxkamad uga doodi karo, maslaxad ka geli karo, qareen u qaban karo haddii loo baahdo, uuna meteli karo dhinac kasta oo Marwo Faadumo Axmed Weheliye looga baahdo guud ahaan hantida ay ku leedahay Magaalada Muqdisho iyo Degmada Afgooye, haddii ay ahaan lahayd guurto iyo magguurto.=====

SAXIIXA LABADA DHINAC

- 1) Marwo Faadumo Axmed Weheliye (Wakiishe) _____
- 2) Mudane Salaad Gabayre Cali (La wakiishe) _____

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

- 1) Mudane Maxamed Cali Nuur _____
- 2) " Cabdulqaadir Maxamed Xuseen _____

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 4ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaam u akhriyey, kuna qanceen.=====



NOOTAAYO
Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil)
[Signature]



NOOTAAYO MUQDISHO
Dr. CALI BIIL
ORIGINAL

JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

Rep.n 2285/2017

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN OO MUNIJIBAALAH

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay **04/03/2017**, anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, Xafiiska ku leh Ceelasha Biyaha, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan oo munijibaale ah, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Mudane **Salaad Gabayre Cali**, hooyadiisna la yiraahdo Xaawo Cabdullaahi Raage, ahna Soomaali, kuna dhashay Magaalada Beledweyne, sanadkii **1951**, lehna Baasaboorka Soomaaliya ee lambarkiisu yahay **P00440013**, ahna laga iibsadaha dhulka;=====
 - 2) Marwo **Faadumo Axmed Weheliye**, ahna 59 sano jir, hooyadeedna la yiraahdo Caasho Cismaan Raage, ahna Soomaali, kuna dhalatay Magaalada Beledweyne, ahna iibsatada dhulka.=====
- Dadkaas dhulka kala iibsaday anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan oo munijibaale ah. Mudane Salaad Gabayre Cali wuxuu Marwo Faadumo Axmed Weheliye ka iibiyey dhulkiisa ah **20x30**, lana mid ah **600MQ**, kuna qoran lambarrada: **3543** iyo **3545-F**, kuna yaalla Degmada Hodan, wuxuuna kaga iibiyey dhulkaas lacag dhan **USD 4,700** (Afar kun iyo toddoba boqolo doollar) oo bannaan, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray laga iibsadaha dhulka, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaas wuxuu Mudane Salaad Gabayre Cali ku yeeshay qoraalka lambarkiisu yahay **2059/2017**, taariikhdiisuna tahay **05/02/2017** ee uu qoray Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil). Dhulkaas waxay sohdimihiiisu yihiin sidatan: **Waqooyi** waxaa ka xiga jid, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, iibsataduna waxay caddaynaysaa inay soo aragtay dhulkaas, fiirto gaar ahna u soo yeelatay, inay la wareegtana ay diyaar u tahay. Sidaas daraaddeed, wuxuu laga iibsadaha dhulku qoraalkaan ku caddaynayaa inuu masuul ka noqon doono wixii ceebaal ah ama durid sharci ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey, markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen.=====

SAXIIXA LABADA DHINAC

1) Mudane Salaad Gabayre Cali (libiye) _____

2) Marwo Faadumo Axmed Weheliye (libsato) _____

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Mudane Maxamd Cali Nuur _____

2) " Cabdulqaadir Maxamed Xuseen _____

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 4ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan u akhriyey, kuna qanceen.=====

NOOTAAYO

Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil)



(Signature)

Waxaa la iibsaday

20x30 In: 3543 iyo 3545-f

Ref: R 2334/2017

Tx: 07/03/2017





**JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO**

Rep.n 2059/2017

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN OO MUNIJIBAALAH

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay **05/02/2017**, anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, Xafiiska ku leh Ceelasha Biyaha, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan oo munijibaale ah, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Marwo **Aamino Jimcaale Xasan Calasoow**, ahna 46 sano jir, hooyadeedna la yiraahdo Xaawo Yuusuf Shiikh Cali, ahna Soomaali, kuna dhalatay Muqdisho, masawirkeeduna warqaddaan ku dheggaan yahay, ahna Marwada dhulka laga iibsaday, taasoo dammiinu aqoonsi uu ka yahay Mudane **Ibraahim Casir Cawaale Barre**, masawirkiisuna warqaddaan ku dheggaan yahay, lagana yaqaan Xafiiskaan;=====
- 2) Mudane **Salaad Gabayre Cali**, ahna 65 sano jir, hooyadiisna la yiraahdo Xaawo Cabdullaahi Raage, ahna Soomaali, kuna dhashay Magaalada Beledweyne, ahna iibsadaha dhulka.===== Dadkaas dhulka kala iibsaday anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan oo munijibaale ah. Marwo Aamino Jimcaale Xasan Calasoow waxay Mudane Salaad Gabayre Cali ka iibisey dhulkeeda ah **20x30**, lana mid ah **600MQ**, kuna qoran lambarrada: **3543** iyo **3545-F**, kuna yaalla Degmada Hodan, waxayna kaga iibisey dhulkaas lacag dhan **USD 4,666** (Afar kun, lix boqol lixdan iyo lix doollar) oo bannaan, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray Marwada dhulka laga iibsaday, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaasi wuxuu ka mid yahay dhulka ay Marwo Aamino Jimcaale Xasan Calasoow ku yeelatay qoraalka lambarkiisu yahay **07538/2014**, taariikhdiisuna tahay **28/09/2014** ee uu qoray Nootaayo Dr. Maxamed Cali Nuur. Dhulkaas waxay sohdimihiisu yihiin sidatan: **Waqooyi** waxaa ka xiga jid, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, iibsaduhuna wuxuu caddeynayaa inuu soo arkay dhulkaas, fiiro gaar ahna u soo yeeshay, inuu la wareegana uu diyaar u yahay. Sidaas daraaddeed, waxay Marwada dhulka laga iibsaday qoraalkaan ku caddaynaysaa inay masuul ka noqon doonto wixii ceebaal ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey. Markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen.=====

SAXIIXA LABADA DHINAC

1) Marwo Aamino Jimcaale Xasan Calasoow

(libiso) _____

2) Mudane Salaad Gabayre Cali

(libsade) _____

SAXIIXA DAMMIINU AQOONSIGA

1) Mudane Ibraahim Casir Cawaale Barre

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Mudane Cabdi Cali Macallin Cabdulle

2) " Cabdullaahi Maxamed Jayte Afrax

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 5ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan akhriyey, kuna qanceen.=====

NOOTAAYO MUQDISHO

Dr. CALI BIIL

ORIGINAL



NOOTAAYO

Dr. Cali Maxamuud Xaaji Jimcaale (Biil)

(Signature)

Wataa lo ibsaday

20X30. In: 3543-3545-f

Ref: 2285/2017

Tt: 04/03/2017



Handwritten mark or signature at the bottom center of the page.



XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO
PUBLIC NOTARY

UJEEDO:- HESHIIS KALA GADASHO DHUL BANAAN

L.07538/2014

Tr.28/09/2014

Sanadka Labada kun Afar iyo Tobanka Maalinta 28-ka Sebteembar 2014 (28/09/2014) Anigoo ah Dr. Maxamed Cali Nuur Xafiiska Nootaayaha Muqdisho, Xafiisna ku leh Wadada H/wadaag ee Degmada H/wadaag inta u dhaxeysa Shirkadda Isgaarsiinta SomTel iyo Shirkadda Xawaalada Dahabshiil waxaa iigu yimid iyagoo heshiis ah dadka kala ah:

1) Cabdulqaadir Axmed Maxamed Muudeey (Ceel) ina Muumino Cumar Cali ku dhashay Galcad 1977 degan Degmada Hodon lehna W.A.L.27701011497494/Xamar, ahna iskagade.
2) Aamina Jimcaale Xasan Calasow ina Xaawo Yuusuf Sh. Cali ku dhashay Xamar 1969 degan Degmada Hodon Garasbaaley ahna iibsato.....Ugu horeyn dadkaasi waxay i weydiisteen in aan u kala qoro heshiis ku saabsan kalagadasho dhul ku yaal degmada Hodon lehna W.L.Q.104619 Tr.15/1/2014 W.L.DH.B/B/19/19/2014 Tr.16/1/2014 D.H.X Lotto L.3543, 3545/F, cabirkiisuna dhan yahay (20X30M) ahna dhul banaan soohdimihiisuna kala yihiin: Waqooyi jid=====, Galbeed dhul dad, Koofur dhul dad, Bari dhul dad, Cabdulqaadir Axmed Maxamed Muudeey (Ceel) wuxuu qoraalkaan ku cadeynayaa in uu ka iibiyey kuna wareejiyey Aamina Jimcaale Xasan Calasow dhulkiisa banaan oo ku yaal degmada Hodon cabirkiisuna dhan yahay (20X30M), Lotto L.3543, 3545/F, Waqooyi jid, intakalana dhul dad, sidaa darteed milkiyadii dhulkaas waxay ku wareegtay Haweenta iibsatay oo ah: AAMINA JIMCAALE XASAN CALASOW, Cabdulqaadir Axmed Maxamed Muudeey (Ceel) wuxuu kaloo qoraalkaan ku cadeynayaa in dhulkaasi uu iska iibiyey ka madax banaan yahay rahan iyo sheegasho dad kale waxayna ku heshiyeen oo ku kala iibsadeen lacag dhan U.S.\$4,700/=(AFAR KUN IYO TODOBO BOQOL OO DOOLAR AMEERIKAAN AH) oo gacanta laga saaray iskagadaha, wixii ka yimaada milkiyada dhulkaasi oo sheegasho dad kale ah waxaa mas'uul ka ah iskagadaha wixii aan ku xusneyn halkaan waxaa loo raacayaa sida uu qabo sharciga Jamhuuriyadda Soomaliya, heshiiskaasina sidaasi ayuu ku dhamaaday markii ay aqristeen dhinacyadu oo ay wada fahmeen ayeyna halkaan hoose wada saxiixeen.

Iskagade: Cabdulqaadir Axmed Maxamed Muudeey (Ceel) C/laahi Maxamed Jayte

Iibsade: Aamina Jimcaale Xasan Calasow

Marag: C/laahi Maxamed Jayte (Simba) C/laahi Maxamed Jayte

" : Ibraahim Casir Cawaale

" : C/raxmaan Xuseen Cali C/raxmaan Xuseen Cali

NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed Cali Nuur

ORIGINAL

Waxaa Ca 116 saday

20X30 Ln: 3543-F

190 3545-F

Rep. n 2059/2017

Tr: 05/02/2017

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARQADDA AQQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/رقم الهوية/National ID
27701011497494



Magaca/الاسم/Name

ABDULKADIR

AHMED MOHAMED



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth
01 Jan 1977 GAL'AD

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue
04 Feb 2014 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry
03 Feb 2019

Lab/Dheddig/الجنس/Gender
MALE



3410/09
 DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
 20x30 WAAXDA DHULKA
 Hoolay
 3543-3545

Xaashida lacag Qabashada No.: 104619

F

Mud / Mar. Caaruur Axmed Maxamed

Waxaan ka qabtay Sh. So. Caaruur, Sayid Boor
de K

oo ah Waxaan ka qabtay

Muqdisho 15/01/2014

B-Qofka Lacagta Bixiyay
 T-Maamulka Lacagta
 J-Nuqul ku haraya Boloogga



Xaashida Lacag Qabashada

12 p. 07938014
M. 28/09/014
20x30



2.3503.3503/f

Armenian Academy of Sciences, Institute of Botany



Mudishe 12/09/014

1-Nudul ku narayn Bolooqra
T-Mamuluk'acagta
B-Qofka'acagta Bixisyay



DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO WAAXDA DHULKA

No.: 104619

Soo Gelidda Warqadda

si

Taariikh:

104619
16-1-2014



Bollettario No.:

Bolletta No.:

Sannadka

19
19
2014

WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA

Mud / Mar.:

Cligadiir AXMED MAHIED

Og.: Tal. Ciidaanka Boliska Dawladda Hoose Muqdisho

- Xamar.

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo oggolaady inuu / iney dhisto Cariish, Baraako ama

Guri Dhaqax ah

20 X 30

oo uu ka dhiiso cad dhul ah oo

le'eg

Deftu

kuna yaal Xaafadda

Hodon

Soohdintiisuna tahay

23543
3545-F

X. Woqooyi

X, Galbeed

X, Bari

iyi loofur

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maanta

Ka billaabmanta, fasax la'aan inaad dhulka dhistid.

Warqadda lacag qaabashada No.

104619

Muqdisho, Taariikh

16-1-2014



Agaasimaha Waaxda Dhulka

Duqa Magaalada

12/07/2014
18/08/2014
20130

PI
PI
WOW

15/05/2014
23523

No: 104619

WARQADDA LAHAANSHAHA DHUKA

Mud. Wax: C/Barobay
AXMED MOHAMED

Og: Tal. Ciidanka Booliska Dawlada Hoose Mudkiro

Mudahafta / Marwada kor ku dagan waxaa loo ogeysiinayaa inay dhiso Carish, Barako ama

Guudiyaga ah: 20 x 20
le: Barobay, kama yari Xarabda
X. Wopoyi: X. Galbeed
3252-7

Warqaddaan xad waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maraan

Ka billaashanta, taas is aan inaad dhulka dibsida

Warqadda lacag darsashada No: 12-1-2014
Mudkiro. Tariikh: 12-1-2014

Barobay
Bada Magaasada



Agasiin: Barobay Dhuka



FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 02/01/2024

Aniga oo ah Sayid-Cali C/laahi Maxamed waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud Dukumiintiga Original Beeca Dhulka ee Rep No. 925/W.P.N/23, Tr. 24/12/2023, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Iibsadaha	Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud
Cabirka	20X15
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	3545-F
W.M.L	XNL/B3/1220/23, Tr. 16/11/2023 Ka soo baxday Nootaayo Liibaan
Taariikhda Beeca	24/12/2023
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Iibsade: Aniga oo ah Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud, Leh Tel No. 0617342701, Degan Muqdisho Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska Nootaayaha Waddani Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayid-Cali C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud